

Hogaanka Waxabarashada ee Qoysaska

Warbaxin kooban oo ilmaha inay ogaadaan ay tahay iyo inay awoodi karayaan inay sameyn karaan iyo sida Qoysasku u kordhin karayaan Ku barashada Guriga.



Ku saabsan hagayaashan waxbarasho:

Hagahaan waxbarasho wuxuu matalaa waxyaabaha ugu muhiim san inuu cannugaaga yaqaano iyo inuu awood u yeesho inuu ku sameeyo afka Ingriiska iyo Xisaabta DHAMAADKA sanad dugsiyeedka. Himilooyinka waxbarashada waxay ka caawinayaan qoysaska iyo macalimiinta inay ogadaan goorta laga yaabo ardayda inay u baahanyihiin kaalmo dheeri ah iyo goorta ay u baahanyihiin in loolan dheeri ah la gelensiyo.

Qoowsasku maxay sameen karaan?

Waxaa jiro siyaaboyin badan oo aad sameen karto si aad u gargaarto waxabarashada cannuggaaga isla markaana aad caawiso u diyaargarowga mustaqbalkooda. Halkaan waxaa ah waxyaabo caawinaya in ardadadu wax bartaan:

1. U sheeg cannugaaga inay waxabarashada muhiim agtaada ka tahay. U sheeg inay waxbarashada wax weyn tahay; inay tahay aasaaska guusha.
2. Ka dhig dugsiga mudnaan, hubi inuu cannugaaga maalin walbo dugsiga waqtigiisa tago.
3. Ikaashi shaqo la yeelo dugsiga una muuji macalimiinta iyo shaqaalaha ixtiraam.
4. Dhiirigeli madaxbanaani, u ogolow cannugaaga inuu sameeyo qaladaad iyo inuu aqbalo mas'uuliyadda xulashadiisa.
5. Cannugaaga kala hadal waxa ka dhacaya dugsiga.
6. La hadal cannugaaga macalinkiisa si aad hubiso horumarka cannugaaga sanada oo dhan.
7. Soo xaadir la kulanka waalidka iyo macalinka iyo dhacdooyinka kale ee dugsiga mar walbo oo suuragal ah.
8. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato sida ilmahaaga yahay, ha ka baqin inaad la xiriirto macalinka ilmahaaga haddii aad su'aalo qabto.

La Xiriirka Macaalinka Ilmahaaga

Waa muhiim inaad si joogta ah uula hadasho ilmahaaga macalinkooda iyo dugsiga si horumarka ku aadan himilooyinka waxbarasho ee ilmahaaga uula socoto. Halkaani waa qaybo ka mid ah mawduucyada ama su'aalaha laga yaabo inaad ka hadasho:

- Dib u eeg hagahaan waxbarasho oo weydiiso meelaha ardayga ku fiicanyahay iyo meelaha ubaahan horumarin.
- Himilooyinka waxbarasho ee ku dhigan hagahaan waxaa dheer, himilooyin kale oo laga filaayo in cannugaaga ka adkaado?
- Weydiiso inaad aragto tusaaloyinka shaqada ilmahaaga iyo sida ay uula kulmeen ama uula kulmi waayeen shaqada.
- Weydii sida horumarka cannugaaga loo qiyaaso sanada oo dhan.

- Weydii in ilmahaagu sidii la rabay yahay si uula kulmo himilooyinka waxbarasho ee heerka fasalka. Haddii uu san ahayn, maxaa gargaar ayuu dugsigu bixindoona? Maxaad guriga ku samayn kartaa?
- Weydii in cannugaaga joogo am ka sareeyo waxbarashada laga filayo. Haddii xaalku sidaa yahay, maxaa kale ayuu dugsigu bixin karaa? Anigu maxaan guriga ku qaban karaa?

La hadalka cannugaaga

“Sidee buu dugsigu ahaa maanta?”

“Fiican.”

“Maxaad samaysay?”

“Waxbo.”

Tani ma u egtahay caadi? Waa caadi, sii weydii! Ardada waalidkood kala hadlo waxa dugsiga khuseeya ayaa ku wanaagsan dugsiga. Halkan waxaa ah qaar ka mid ah siyaabaha aad ku howlgelin kartid cannugaaga oo ku taageeri kartid guushooda:

- Samee waqti caanuga wax dugsiga ku saabsan ka kala hadashid maalin kasta.
- Weydii cannugaaga hal shay oo manta soo barten. Muxuu cannugaaga u maleeyaa inuu aad u xiiso badanyahay? Maxaa u muuqda adeeg?
- Dib u eeg warqadaha iyo mashruucyada cannugaaga dugsiga ka keeno. Weydii cannugaaga inuu kuu sheego casharada waxbarasho ee ay muujinaayan.
- Ilmahaaga ku amaan shaqo adag iyo dadaal, ha ku amaan “jawaabta saxda ah” oo kaliya.
- Weydii su’aalo ku saabsan waxa ilmahaaga ka fakarayo: Sidee baad ku garanaysaa taas? Maxaad aragtaa? Maxaad sidaa ugu sameeysay? Ma jirtaa si kale oo jawaabtaas lagu heli karo?

Taageeridda Waxbarashada adoo Dugsiga ka Dheer

Waxbarashad ma ahan inay joogsato goorta ilmaha dugsiga ka soo tagaan. Ardadu waqtiga dugsiga waqti ka badan ayey dibadda ku qaatan. Halkan waxaa ah qaar ka mid ah siyaabaha aad ku taageeri kartid waxbarashada dugsiga adoon joojin:

- Dhiirgeli ilmahaaga inuu akhriyo, la akhri ilmahaaga, dhiirgeli waqti qooyaska wax wada akhristo – lugadda kuugu fudud.
- Hagaaji meel xasiloon oo wacan oo ilmahaagu ku sameeyo shaqada guriga ama howlaha waxbarasha ee kale.
- Isku day inaad jadwal jooqta ah samayso oo lagu sameeyo shaqada guriga ama howlaha waxbarasho ee kale.
- Isticmaal hagahaan si aad diiradda u saarto himilooyinka waxbarasho, isku day talooyinka qaar inaad xaafada ku barato.

Waxa ah inuu ardaygaagu yaqaano oo laga doonaya inuu awoodo in Luqadda Farshaxanka Ingiriiska ku samayn karo:

Dhageysiga iyo Hadalka

- Inuu la qaato wada hadal sheekeysii dheer qof qaan gaar ah isagoo sugaya markiisa wax khuseeya mawduuc.
- Weydii, “Taasi waa maxay micneheedu?” markuu maqlo eray cusub.

Akhriska iyo suugaanta

- Inuu garto qoraalka oo qoro nolol maalmeedkiisa ama keeda. *Tusaale – calamadaha laga yaqaana dariska ama sumadaha cuntooyinka uu jecelyahay ee dukaanka.*
- Dib u sheego ama qoro sheekooyinka dhoor jeer loo sheegay.
- Tilmaamo xuruufta la midka ah bilowga dhawaaqa magacyada ee saaxibada ama dadka qooyiska ka tirsan. *Tusaale – “H” waa Hooyo, “A” waa Aabo*
- Iska dhigo inuu akhrinayo buug uu yaqaano. Roggo boggoga sida haboon oo isticmaalo sawiro si u sheego sheeko.

Qoraalka

- Qoro magaciisa/magaceeda iyo magacyada dadka muhiimka ah sida walaalaha, ama saaxibada isagoo isticmaalaya isku darka xuruuf waaweyn iyo mid yar.
- Sawir sawiro oo sheeka ka bixiyo.
- Calaamada sameeyo (sida Fadlan Badbaadi), sameeyo liis (sida cuntooyinka uu jecelyahaysuch), iyo fariimaha (sida “Aniga waan ku jeclahay”) si dana gaar ah.



Siyaabaha loo Dhiirigelin karo Barashada ELA marka Guriga la joogo

- La akhri cannugaaga maalin walbo luqad walbo oo kuu fudud. U ogolow cannugaag inuu doorto sheeka aad wada akhrisaan. Ka dhig arintan howl joogto ah, sida xiliga hurdada ka hora ama cuntada kadib.
- Marka sheega wada akhrisaan si wada jir ah, weydii cannugaaga qaybta ugu jeclaa. Wadaag afkaartaada sido kale. Dhiirigeli ilmahaaga inuu ka hadlo wax sheekada khuseeya si uu ugu baashaalo isagoo ku darayo dhamaad cusub ama samaynayo jilaa cusub.
- La ciyaar ciyaarta xarfaha sida “I Spy”, hees hees sida “Heesta Alifbeetada”, iyo akhrinta sida erayda dhawaq ka wada bilowda sida “Miss Mary Mack”.
- Cajiib la noqo ilmahaaga. Raadi wax un adoo si taxadar leh u fiirinaya, sawirayo waxaad aragto, oo ka baraayo buugaagta guriga ama maktabada.
- Ka dhig waxyaabaha akhriska sida buugaagta carrurta, wargeesyada, iyo gabayada inuu ilmahaagu helo waqti walbo.
- Kadib marka sheeka cannugaaga la akhriso, dib u sheeg sheekada si wadajir ah malintas xiligeeda danbe, sida xiliga cashada ama goorta ay seexanayaan.

Qoraalo:

Fadlan sido kale la xiriir macalinka ilmahaaga oo weydii waxyaabaha waxbarasho ee guriga oo la xiriira gaar ahaan barnaamijyada qooraalka iyo akhriska dugsiya.

Waxa laga doonayo inuu ardagaagu yaqaano oo awood u leeyahay inuu sameeyo si xisaabta u sameeyo

- ❑ Inuu muujiyo xiisa u qabo nambarda iyo qaababka noolashada joogtada –guriga, dugsiga, iyo dariska. Weydiyo su’aalo khuseeya nambarda iyo qaababka.
- ❑ Tiriyo ilaa iyo10.
- ❑ Fahmo in tirada sheegayso inta wax uu yahay. Tiriyo sheyaal istaba taxan oo ka jawaabo su’aasha “Meeqaa?”
- ❑ Is barbardhigo kooxaha walxaha. *Tusaale – tiriyo sheyaha cunnada fudud si u ogaado inuu saxibadiis iyo isaga inay tiro siman haystaan, ka yar, ama ka badan.*
- ❑ Bilaboo inuu isku daro xisaabadka sheeya. *Tusaalee – dheh “Waxaan heystay saddex orso waxaan helay mid dheeri ah, hada waxaan heysta afar orso.”*
- ❑ Aqoonsado oo sameeyo qaabab fudud, sida goobada, saddexagal, iyo laydi. Inuu iticmaalo qaabab badan si u sameeyo sawir cusub ama xujo dhameystiran.
- ❑ Is barbardhigo sheeyo badan si u ogaado midka dheer ama inay simanyihiin.
- ❑ Ku celiyo hab israaca dhaq-dhaqaaqa sida sacabka, madaxa taaba, sacab, madaxa taabo. Nuqul fudud oo is raac-racaaya inuu samayn isago isticmaalaya midabo sida, casaan, jaala, casaan, jaala.



Ku barashada xisaabta Guriga

- Raadi maalin walbo fursado wax lagu tiriyo. *Tusaale – Tiri inta daaqadood ee dismahaaga ku taala, imisaa qalin ayaa sanduuqa ku jirta, ama imisaa kuraas ayaa miiskaaga leeyahay. Tiri inta tilaabo ee jaraanrada kore u socoto dib usoo xiisaab inta talaabo ee aad uso qaado kolka hoos uso dagaysid.*
- Ugaarsiga nambarada. Raadi nambarada ku qoran sacaadaha, calaamadaha ama teebka kombuyutarka. Ku dhiirigeli cannugaaga inuu qoro nambarka iyo inuu sheego magaca nambarka marka uu qorayo.
- Raadi qaababka sida goobada, laydi, iyo saddexalada ee gurigaaga ama dariskaaga. Dhis qaabab adoo isticmaalaya waxyaabaha aad gurigaaga ka heli karto sida xarig, shega sharaabka lagu dhuuqo, ama findhicilada.

Qoraalo:

Fadlan sido kale la xiriir macalinka ilmahaaga oo weydii waxyaabaha waxbarasho ee guriga oo la xiriira gaar ahaan barnaamijyada xisaabta dugsigaa..



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

Academics Office
353 Cumberland Avenue
Portland, Maine 04101
207.874.8100
portlandschools.org

L.L.Bean

Buuggan Tilmaanta Waxbarasho ee waalidka waxa suurto geliyey deeq aan ka helay L.L. Bean.

Buug-yarahaan waxaan soo saaray Dugsiyada Dadweynaha Portland. Isticmaal qoraalka iyo wax ka badalka waxa lagu sameeyey ogolaanshaha Dugsiyada Dadweynaha Boston. Qoraalada dheeriga ah waxay ku salaysihiin shaqada Dr. Anthony L. Moore.